

# Naftaada ka badbaadi dabka guriga ka kaca

## Yaree khatarta badka



Walxaha guban kara ka fog-gee goobaha ku dhow dhow shoolada. Bakhtii shoolada ka hor inta aanad ka tagin.




Dambaska iyo dhuxusha, ku rid baaldi bir ah oo dabool leh. Waligaa bacda qashinka ha ku ridin dhuxul kulul.



Bakhtii shamaca ka hor inta aanad halkaas ka tagin. Ha dhigin shamac shidan meel u dhow walxaha guban kara.



Ha isticmaalin qalabka korontada ee fiilooyinka ama fiishadaha googo'an leh.



Walxaha guban kara ka foggee goobaha ku dhow dhow hiiterka.



Waxyaalaha guban kara ha dhigin jaranjarta.

## Talooyin wanaagsan

- Haku cabin sigaar sariirta korkeeda ama meelaha kale ee aad ku gammi karto.
- Biyo ku shub haashtariga ka hor inta aanad ka qubin.
- Hubi in aanay carruurtu qaadan walacada.




Storstockholms  
brandförsvar

# Iska badbaadi dabka

## Alaarmka dabka ayaa nolol badbaadiya


Alaarmka dabka ayaa si degdeg ah kuugu digaa haddi uu dab bilowdo. Markaa ayaad ka gaadhsiin kartaa inaad ka baxdo haddii loo baahdo.



Alaarmku waa inuu ku dhaganaado saqafka sare.




Alaarmka tijaabi marar badan adigoo dhowr daqiiqo riixaaya badhanka.



Ka bedel baytariga haddii aanu alaarmku shaqeynaynin ama haddii uu bilaabo dhawaaq/ci.

## Sidan ayaad u isticmaalaysaa dab damiyaha



Ka jiid badhada amaanka.



Ku beeg dabka xagiisa hoose.



Hoos u riix handhalka/meesha la qabto.

## Soo iibso dab damiye

Dab damiye nooca budada ee 6 kiiloo ah ayaa wanaagsan in guriga lagu haysto. Waxa sidoo kale wanaagsan inaad haysato bustaha dabka. Kaas oo aad dabka dul saari karto si aad ugu damiso.



# Badbaadi - U dig - Alaarm garee - Dami

## Samee waxyaalaha haboon marka uu dabku dhaco oo nolol badbaadi

1. Badbaadi 2. U dig 3. Alaarm garee 4. Dami.



Badbaadi oo u dig dadka kale ee khatarta ku sugan.



Wac 112. U sheeg meesha gubaneysa, haddii uu qof ku dhaawacmay iyo cida aad adigu tahay.



Demi dabka haddii aad u maleynayo inaad awoodi karto.


## Dabka sidan oo kale u dami



Dabka ka kaca shoolada: Saar furka ama bustaha dabka. **Marnaba** ha isticmaalin biyo!



Dabka dharka qabsada Iskudey inaad qofka jifiso. Dabka ku cabudhi filterka dabka. Ka bilow inaad madaxa ka soo damiso oo aad hoos u socoto.



Dabka qalabka korontada ka kaca: Ka saar fiishada. Dabka ku cabudhi filterka dabka ama biyo. Haddii aad haysato dabdamiyeha budada ayaad damin kartaa iyadoo aanad fiishada ka saarin.

# Xidh albaabka - qiiqu waa dilaa

## Haddii uu dabku adiga gurigaaga ka kaco



Iskaga bax haddii aanad bakhtiin karin.



**Xidh albaabka!** Markaas ayaanu qiiqa iyo dabku fideyn.



Wac 112.

## Haddii uu dabku qof kale gurigiisa ka kaco

Ha u bixin **waligaa** jaranjar qiiq ka baxaayo. Ha isticmaalin **waligaa** wiishka haddii ay meeshu gubanayso.



Ma qiiq ayaa ka baxaaya jaranjarta? **Iska joog gurigaaga dabaqa dhexdiisa!** Guryaha ayaa dabka iska caabin kara ugu yaraan 60 daqiiqo.



Albaabku waa inuu xidhnaado. Wac 112.



Markaa ayay gargaarka degdegi ku caawin karaan haddii loo baahdo.

Ciidanka dabdemiska ee Storstockholm, sibtember 2017.  
Laga soo xigtey: Myndigheten för samhällsskydd och beredskap.  
Farshaxanka: Martin Ek. [www.storstockholm.brand.se](http://www.storstockholm.brand.se)

Somaliska



Storstockholms  
brandförsvär